



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya  
Golaha Shacabka**

HadalQoraalka Kalfadhiga 3-aad  
Documintiga k.3aad kul.4aad16/09/2013

---

**Kalfadhiga 3-aad**

**Kulankiisa 4-aad Taariikhda 16/09/2013,saacadda 11:00ghsaacadda12:10gd.**

**Guntinta:146**

**Ajendaha:**

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Warbixinta safaraddii:-**
  - a) **Wadanka Ingiriiska (Xil.Cabdikaafi Macalin Xasan)**
  - b) **Qeybinta Mooshinada la keenay**
  - c) **Qeybinta Formka Gelidda Madaxtooyada**
4. **Warbixinta Deeganada:-**
  - a) **Goboladda Puntland(Xil.CabdiBarre)**
  - b) **Gobolka Gedo (Xil.Muuse Sh. Cumar)**

**Shirguddomiye –Guddoomiyeku-xigeenka1aad ee Golaha Shacabka Mudane  
Jeylaani Nuur Iikar.**

Fadhigii4-aad uu shir-guddoominayay Guddoomiye Ku-xigeenka 1-aad Mudane Jeylaani Nuur Iikar ayaa waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka Kariimka waxaana akhriyay Xil.Maxamed Axmed Kulan.

Kadib,Guddoomiyaha wuxuu sheegay in shirkii shalay uu u baaqday kooram la'aan ,ilo xogogaal ahna ay sheegayaan Xildhibaano kooramka kabadan in ay wadanka joogaan, loona baahanyahay in lays xilqaamo oo umadda la matalaayo loo shaqeeyo ,waxaad na ogtihiin umadda soomaaliyeed iyo Aduunkaba ay ildheer nagu ee gaayaan, waxaakaloo ogaataan in Xeer-hoosaadka uu idinqabandoono anagana uu naqabandoono.

Intaa kadib,Guddoomiyaha wuxuu uyeeray Xil. Cabdikaafi Macalin Xasan si uu warbixin ugu bixiyo safar uu kutagay dalka Ingiriiska.

Xil.Cabdikaafi wuxuu khudbadisa ku sheegay in wadanka ingriiska si wanaagsan loogu soo dhaweeyay isaga iyo wafdigii ay isla socdeyn , ayna sheegeen in ay aad u jecelyihiin in ay arkaansoomaali oo mid ah,waxay kale oo ay noosheegeen in ay rabaan in ay maalgashi ku sameeyaan dalka Soomaaliya oo hodonka ah

ganacsatada ingiriiskana ay quud daneynayaan in tijaabo maalgashi kusameeyaan dalka Soomaaliya.

**Xil.Cabdi Axmed dhuxulow** :wuxuu sheegay in la laxisaabtamo xildhibaanada aaday Goboladda dalka ,waxaana hadda bilaabatay shaqada Baarlamaan ka waxaana loo baahanyahay in hoosha culusee Golaha hortaako laqabto.

Kadib ,Guddoomiyaha wuxuu u yeeray wafdigii tagay Gobolka Putland oo warbixinta u akhrinayay Xil. Cabdibare Sheekh Yuusuf.

**Xil.Cabdi Barre**:wuxuu sheegay in uu fasax ku tagay Gobolada Mudug, waxayna halkaas kula soo kulmeyn dad ay haysato baahida kaladuwan eea asaasiga ah sida: in ay helaan ceelbiyood,iskuulo ,Isbitaal iyo adeeg bulsho oo dhameystiran.

Waxaa kaloo warbixintaa ka duwan sheegay **Xil.Cali Axmed**

**Maxamed(Ameeriko)**wuxuu sheegay in uu safar ku tagay Gobolada Puntland ay ka koobantahay ayagoo u kuurgalaayo xaaladda nololeed ay ku noolyihiin degmooyinka ay kormeerku soomareen ,waxay halkaas ku soo arkeen in ay qabaan baahi weyn oo kala duwan sida :caafimaadka, ceelbiyoodka,iskuulada IWM.

Wuxuu kaloo afkaku adkeeyay in Degmada Goldogob oo ay qabsadeen Ithobiya waqtiyada dagaalada ay socdeen oohalkaas kuburburay halKi iiskuul ay la haayeen ,manahaystaan ceelbiyood ,Isbitaalna wuxuuna soo jeediyay in si deg deg ah wax loogu qabto dadkaas oo lagu sheegay in ay yihiin dadka laga tirade badanyahay.

**Xil.Muuse Sh. Cumar** :wuxuu halkaas ka soo jeediyay safar ay ku tageen Gobolka Gedo iyo Degmooyikiisa. Waxay halkaas kula soo kulmeyn waxay ku soo gudbiyeen ayagoo qoraal iyo muuqaal ah , waxaa halkaas kula kulmeen guddoomiyaha Degmada oo Doolow iyo Odiyaasha Degmadaas waxayna weydiyeen mudada sanadka ah ay shaqeynaayeen waxa ay kakeenen Dowladda.

Iyagoo markaas ka codsaday Dowladda in ay ubaahanyihiin ceelal, isbitaalo iskuulo iyo dhamaan adeega bulshada,waxay kaloo ay lakulmeyn hey'ado samafal ah ee jooga degmada luuq. Waxay koloo soo jeediyeyn in laga siiyo deeqaha waxbarasho ee dowladda hesho iyo in ay helaan dabdamis si looga hortago masiibooyinka mar marka qaar ka dhaco Gobolkaas.

Wuxuu u mahad celiyay dhamaan madaxdii ay la kulmeyn , shacabka, dhalinyarada ,odayaasha, culumaa'udiinka iyo ururada bulshada.

**Kalfadhiga 3 aad Kulankiisa 4-aad uu shir -guddoominayay Guddoomiye ku-xigeenka 1aad ahna K/S. Guddoomiyaha Golaha Mudane Jeylaani Nuur Ilikar ayaa sheegay in shirka xiranyahay saacadda marka ay ahayd 12:10gd.**